

**Ma dooneysaa in aad  
ogaato in badan  
oo ku saabsan  
xuquuqahaaga  
goobta shaqada?**

**Waxaad  
heysataa  
saaxiib  
awood leh**



# Ka hel waxyaalo ku saabsan xuquuqahaaga halkan:

- mushaarka ugu hooseeyo ee qaranka
- saacadaha shaqada
- u shaqeynta wakiil
- ka shaqeynta beeraha
- u shaqeynta gangmasters'ka



Warqaddan waxaa ku qoran qaar ka mid ah xuquuqaha shaqada ee uu leeyahay qof kasta oo ka dhex shaqeeyo gudaha UK. Haddii loo shaqeeyahaagu uusan raacin qaanuunkan sharciga ayuu jebinayaa.

Hadda waxaa jiro qadka caawinta ee Xuquuqaha Shaqeey oo Qaado lacagta waad wici kartaa si aad u ogaato in badan oo ku saabsan xuquuqahan. Qadka caawintu wuxuu kaa caawin karaa in aad hesho waxa aad xaqa u leedahay.

Qaanuudanada shaqeey oo lacagta qaado waxaa lagu dabaqaa dhammaan shaqaalaha (eeg bogagga 3'aad iyo 4'aad). Waxaa xattaa jiro qaanuuno gaar ah oo loogu talo galay shaqooyin gaar ah. Arimahaas waxaa lagu sharaxay warqadda inteeda kale.

Loo shaqeeyahaagu waa in uu ku siiyaa xuquuqaha kale ee shaqada, sida lacagta fasaxa la isi siiyo iyo fasaxyada nasashada, waana in uu dhowraa n caafimaadkaaga iyo amnigaaga inta aad shaqeyneyso. Haddii aad heyso arimo noocan ah, ama xuquuqaha shaqo ee kale oo aan halkan lagu xusin, ka wac acas wixi talo ah halkan **08457 47 47 47**, ama booqo **www.direct.gov.uk**.

Wixii waydiimo ah ee la xiriiro caafimaadka iyo amniga, kala xiriir HSE halkan **0845 345 0055**.

# Qaanuunada Mushaarka ugu Hooseeyo ee Qaranka

- Haddii aad tahay 22 jir ama ka weyn waa in lagu siiyaa ugu yaraan £5.80 saacaddii. Kani waa mushaarka ugu hooseeyo ee qaranka.
- Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay mushaarka ugu hooseeyo ee qaranka. Arintan waxaa ku jiro shaqooyinka ku meelgaar ah, kuwa halka gelin ah iyo iska caadiga ah, shaqaalaha guryaha, shaqaalaha waxay qabtaan wax ku qaato, iyo dadka wadamada kale.
- Laga bilaabo 1'da Oktoobar 2009, wax allaale wixii aad shaxaad ahaan u bixiso waa in ay dheeri ka yihiin, mushaarka ugu hooseeyo ee qaranka.
- Loo shaqeeyahaagu lacag kaagama qaadi karo waxyaalaha sida qalabka, dharka ka hortagga, ama uniforms'ka isagoo ka jarayo mushaarkaaga haddii taasi ay mushaarkaaga ka yareyneyso mushaarka ugu hooseeyo ee qaranka.

Caddadka mushaarka ugu hooseeyo ee qaranka wuu isbedeli karaa sanad kasta, bisha Oktoobar.

## Shaqaalaha da'yarta ah

Lacagta dada da'doodu ka hooseeyo 22 waa:

- £4.83 saacaddii haddii ay da'doodu tahay 18 ilaa 21.
- £3.57 saacaddii haddii ay u dhexeeyaan da'da dugsi ka bixidda kana hooseeyaan 18.

## Qaar laga tegay

- Dadka qaar waa in aan la siin mushaarka ugu hooseeyo ee qaranka tusaale ahaan, qaar ka mid ah apprentices'ka iyo ardayda ku jirto tababar shaqo.
- Loo shaqeeyahaagu wuxuu uga jari karaa ilaa £31.57 todobaadkii lacagtaada guriyeyn ahaan ahaa. Tan waxaa loo yaqaan 'lacagta loo jaro guriyeynta'.
- Haddii aad ka shaqeyso nooc kasta oo shaqo beero ah, waxaa jiro sicir mushaarka ugu hooseeyo ee qaranka oo nooc kale (eeg bogga 6'aad).

## Ma waxaad qaadataa mushaarka ugu hooseeyo ee qaranka?

Waa in aad heshaa warqad lacageed muujineyso lacagta lagu siiyo. Waxaa kale oo la doonayaa in ay muujiso inta lagaa goosto, tusaale ahaan canshuurta.

Laakiin in aysan kala cadeyn in aad qaadata mushaarka qaranka ee ugu hooseeyo iyo in kale. Lacagaha qaar lama xisaabiyo – sida qarashka. Ama waxaa dhici karto in aadan qaadan lacag ku saleysan saacad kasta.

Si aad u ogaato in badan, ka wac qadka caawimaadda bilaashka ah halkan **0800 917 2368**, ama booqo **[www.direct.gov.uk/payandworkrights](http://www.direct.gov.uk/payandworkrights)**

# Qaanuunada saacadaha shaqada

- Waa in aadan shaqeyn wax ka badan celceliska 48 saac todobaad kasta.
- Arintan waxaa lagu dabaqaa qof kasta oo ka shaqeeyo gudaha UK.
- Haddii aad ka weyn tahay 18, waxaad dooran kartaa in aad shaqeyso waqti intaa ka dheer haddii aad sidaa dooneyso – laakiin loo shaqeeyahaagu kuguma qasbi karo. Waa in aad saxiixdaa heshiis qoraal ah oo arintan ku saabsan.

## Xisaabinta saacadaha aad shaqeyso

Mararka qaarkood waxaad gelisaa waxyaalo ka baxsan shaqada caadiga ah 48'da saac, sida:

- tababarka shaqada
- waqtiga safarka haddii uu shaqada qayb ka yahay
- saacadaha dheeraadka ah ee lacagta la qaato.

Saacadahaaga shaqada kuma dari kartid:

- fasaxyada qadada
- safarka lagu aado ama looga yimaado shaqada
- saacadaha dheeraadka ee lacag la'aanta ah ee aad doorato.

## Shaqaalaha da'yarta ah

Dadka da'da yar (laga bilaabo da'da dugsi ka bixidda ilaa 18) waxay shaqeyn karaan oo kali ah siddeed saacadood maalintii, iyo ilaa 40 saacadood todobaadkii.

## Shaqooyinka qaar ka mid ah ayaan mar kasta halkan looga hadlin

Waxaa jiro shaqooyinka qaar ka mid ah oo waqti dheer in la shaqeeyo la ogol yahay xaaladaha qaar. Kuwan waxaa ka mid ah:

- qaar ka mid ah shaqooyinka ciidanka qalabka sida, booliiska, adeegyada dab damiska iyo ambalaasta
- shaqooyinka doomaha kaluumeysiga, ama maraakiibta ganacsiga ee ka shaqeeyo harooyinka iyo biyaha jasiiradaha
- qaddaamooyinka guryaha gaarka loo leeyahay.

Si aad u ogaato in badan, ka wac qadka caawimaadda bilaashka ah halkan **0800 917 2368**, ama booqo **[www.direct.gov.uk/payandworkrights](http://www.direct.gov.uk/payandworkrights)**

# Haddii aad u shaqeyso wakiil

- Wakiilku waa in ay lacag ku siisaa saacad kasta oo aad shaqeyso.
- Waa in aadan waydiin lacag aad shaqo ku raadsato.
- Wakiilku waa in ay qoraal ahaan kuugu sheegaan inta ay ku siinayaan, qodobada iyo shuruudahaaga iyo nooca shaqada ay kuu raadin doonaan.
- Wakiilku waxba ugama goosan karo lacagtaada waxyalaha sida qalabka dharka ka hortagga, ama uniforms'ka ilaa uu kuu sheego adna aad ku waafaqdo.
- Waxay kugu soo dalici karaan adeegyada dheeraadka ah, laakiin kuguma qasbi karaan in aad isticmaasho adeegyadan iyadoo shardi u ah in shaqo lagu helo.

Waxaa jiro sharciyo kala duwan oo la xiriiro madadaalada ama wakiilada dhar xayaysiinta, ama ka eeg [www.direct.gov.uk](http://www.direct.gov.uk)

Heerarka la Socodka Wakiilada Shaqo helista waxaa lagu hubiyay in ay wakiiladu sharciga u hogaansamaan. Waxay baaritaan ku sameeyaan cabashooyinka lidka ku ah wakiilada shaqo raadinta.

## Xuquuqaha kale ee shaqo

Waxaa kale oo aad xaq u leedahay waxyaalaha sida lacagta fasaxa iyo fasaxa nasashada.

Si aad u ogaato in badan, ka wac qadka caawimaadda bilaashka ah halkan

**0800 917 2368**, ama booqo

[www.direct.gov.uk/payandworkrights](http://www.direct.gov.uk/payandworkrights)



# Haddii aad ka shaqeyso beero

Waxaa jiro sharciyo u gaar ah dadka ka shaqeeyo beeraha.

Beeraha waxaa ka mid ah beeraha xoolaha, nooc kasta oo cunto beer looga soo saaro, horticulture'ka, dhireynta suuqa ama beerista ubaxa, cunto baakadeynta, iyo orchard'ka ama maareynta dhulka dhirta dhaadheer.



- Waa in lagu siiyaa ugu yaraan £5.81 saacaddii.
- Xaq ayaad u leedahay arintan, xattaa haddii aad shaqeyso halgelin, xilli, caadiyan ama aad wixii aad qabato wax ku qaadato.
- Waa in caadiyan lagu siiyaa lacag isla mid ah haddii aad xanuunsato aad shaqada ku dhaawacanto.
- Haddii guriga uu ku siiyay loo shaqeeyaha, lacag ayay u goosan karaan arinan. Waxay qaadan karaan oo kali ah ilaa £31.57 todobaadkii.
- Waxaad waydiisan kartaa in aad aragto diiwaanka lacag qaadashadaada, loo shaqeeyahaaguna waa in uu ku tusaa. Intaa ka dib waxaad jeegareyn kartaa waxa lagu siiyo.

Haddii aad u shaqeyso gangmaster'ka, fadlan eeg bogga 7'aad.

Si aad u ogaato in badan, ka wac qadka caawimaadda bilaashka ah halkan  
**0800 917 2368**, ama booqo  
**[www.direct.gov.uk/payandworkrights](http://www.direct.gov.uk/payandworkrights)**

# Haddii aad u shaqeyso gangmaster'ka

Gangmasters'ku waa ganacsi shaqaalaha shaqo ka siiyo warshado gaar ah. Waxaana ka mid ah beeraha, xadiiqadaha suuqa, ururinta shelfish'ka, iyo baakadeynta iyo sameynta cuntada iyo cabitaanada.

- Waxaad leedahay xaquuq la mid ah tan lacag iyo saacadaha shaqo ee shaqaalaha kale.
- Loo shaqeeyahaagu waa in uusan kaa hor istaagin in aad shaqo kale qabato, in aad qaadato baasaboorkaaga ama dokumeentigaaga, waa in uusan lacag kuu siin si aad shaqada uga tagto, ama uusan kuugu caga juleyn nooc kasta.
- Loo shaqeeyahaagu lacag kaagama goosan karo waxyaalaha sida qalabka, dharka a hortagga, ama uniforms'ka.
- Ma aha in aad joogto guri uu ku siiyay loo shaqeeyahaaga. Haddii uu loo shaqeeyahaagu ku siiyo guri aad degto, waa in uu yahay mid amni leh.

Hay'adda Shatiga siiso Gangmasters'ka waxaa loo dhisay si ay u ilaaliso dadka u shaqeeyo gangmasters'ka. Waxay joojin kartaa howsha gangmaster'ka haddii aysan ula dhaqmi shaqaalaha si wanaagsan.

## Xuquuqaha kale ee Shaqaalaha

Waxaa kale oo aad xaq u leedahay waxyaalaha sida lacagta fasaxa, lacagta xanuunsanaanta iyo tan tababarka.

Haddii aad u shaqeyeso wakiil, fadlan eeg bogga 5'aad.

Si aad u ogaato in badan, ka wac qadka caawimaadda bilaashka ah halka **0800 917 2368**, ama booqo **[www.direct.gov.uk/payandworkrights](http://www.direct.gov.uk/payandworkrights)**

# Sida loo ogaado warar dheeraad ah



Wicitaanada telefoonada gacanta qaarkood waxay noqon doonaan bilaash kuwa kalana lacagtoodu way kala duwanaa kartaa. Ka hubi shirkadda telefoonka gacanta ku siisay wixii warar dheeraada ah.

## Wac qadka caawimaadda haddii aad:

- u baahan tahay caawimaad iyo talo dheeraad ah
- u maleyneyso in aan lagu siin lacagta saxda ah, ama la jebiyay xuquuqaha aad u leedahay shaqada iyo mushaarka
- dooneyso in aad ogaato in aad qaadato mushaarka ugu hooseeyo ee qaranka.

Wicitaanada qadka caawimaaddu waa bilaash waana qarsoodi. Waxaad talo iyo caawimaad ku heli kartaa in ka badan 100 luuqadood. Haddii aad doneyso in aad cabasho sameyso, looma baahno in aad sheegto qofka aad tahay.

Waxaa kale oo laga heli karaa macluumaad waxtar leh halkan [www.direct.gov.uk/payandworkrights](http://www.direct.gov.uk/payandworkrights) ama waxaa dhici karto in uu waxtar kuu yeesho la hadalka loo shaqeeyahaaga.

Wixii kale ee la xiriiro arimaha xuquuqaha shaqaalaha ee aan halkan lagu qorin. Kala hadal Acas wixii talo ah halkan **08457 47 47 47**, ama booqo [www.direct.gov.uk](http://www.direct.gov.uk)

Taa bedelkeeda waxaad booqan kartaa Xafiiska la Talinta Muwaadiniinta, si aad u ogaato xafiiska kuugu dhow eeg buuggaaga telefoonada deegaanka ama booqo [www.citizensadvice.org.uk](http://www.citizensadvice.org.uk)

